

**DU KAN STOPPA  
HUVUDLÖSSEN!****Avlusningsdagarna  
17-19 September**

Dina barn kan ha löse utan att Du vet om det...

Om vi undersöker barnen samtidigt, minskar risken för huvudlöss- epidemier.

Ta fram lusammen och kamma du också!

Sponsras av [www.LusFri.nu](http://www.LusFri.nu)

# AVLUSNINGSDAGARNA 17-19 SEPTEMBER



Dags för alla att bekämpa huvudlössen - ta fram lusamma och kamma du också!

## Maxaan sameeyaa si aan natiijada ugu wanaagsan ee ugu suuragalsan aan u helo marka shanleysanayo?

Qaado shanlo caadi ah ama buraash oo meesha ka saar guntimaha. Xoogaa timaha qoo ka dibna ku billow inaad shanleyso adigoo isticmaalaya shanlo injireed ilkaheedu sida ugu suuragalsan isugu dhow yihiin. Waxaad isticmalai kartaa xoogaa daawada timaha lagu buufiyo si ay markaas shanladiyo si fudud ugu jiidanto timaha. Si aad si wanaagsan ugu aragtid injirta iyo ukumaha soo dhacaya, waxaad ku aaddin kartaa warqad cad ama muraayad.

1. Ku billow adigoo timaha ku shanleynaya iyadoo taaj saran yahay. Si toosan labo ugu kala dhig ka dibna timaha u kala qaybi qaybo.



2. Qaybaha midba mar shanlee. Ka ilaali qaybaha aad shanleysay kuwa aad aadan weli shanleyn. U sii soco dhinca qoorta.



3. Si aad ah u taxaddar marka aad shanleynayso khadadka timaha ama qoorta sababtoo ah injirtaa jecel.



Si taxaddar leh shanlada u nadiifi marka aad dhammeyso. Jeermiska ayaad ka dili kartaa shanlooyinka birta ah adigoo dhowr daqiiqadood biyo karkariinaya

## Aaraa!

Dooro shanlo injireed oo ilkaheedu aad isugu dhow yihiin si markaas adkeysii gaar ah ay ugu yeelato marka aad timaha marineyso. Tani waxay kordhineysaa fursadda aad mar walba injir kala duwan uga soo saareyso shanlada amarkaad marisaba.

## Injir ka feedhashada: waa arin ay cadey in loo sameeyo sida ilko cadayashada!

Injir ka feedhashadu waa muhiim si la iskaga ilaaliyo injirta, si la mid ah siday muhiimka u tahay ilko cadayashadu si la iskaga ilaaliyo in suus ku galo. Ilaa xiligii vikingka (vikingatiden) ayay feedhashadu aheyd qeyb muhiim ah oo ka mid ah nadaafada, iyadoo waxyaalaha laga helay xabaalaha faykinku ay tuseysay inay garfeedhu aheyd wax muhiim ah oo xabaasha u raaci jirtey. Muddo xili dhexda ah ayaynu luminey feedhashadii maalinaha aheyd iyadoo ay hadda injirtu ku taalo carruurteena dhigata dugsiga/xataanada.



Markaas ayay su'aashu tahay, haddii ay awoowyaasheen u arkeen in garfeedha injirta la is mariyo aroor kasta, miyaaney aheyn inaynu caadadaa qadiimka dib u soo celino oo sidaas oo kale aynu sameyno? Samee sida vikingka oo dharbaaxo ku dhifo injirta! Caadeysa inaad isticmaasho garfeedha injirta ugu yaraan hal mar/todobaadkii, iyadoo ay ka fiican tahay inaad aroor walba isticmaasho ama mar kasta oo aad dhaqdo timaha.

## Wadajir ayaynu iskaga ilaalin karnaa faafitaanka weyn ee injirta. Ka qeyb qaado maalmaha injir iska gurista ee 17-19 Sebtembar

Si aad uga hor tagto inaanu dhibaato injirta ku aragno dugsig ayaanu ku dhiiri galinaynaa dhamaan waalidiinta inay ka qeyb qaataa maalmaha injir iska gurista ee guga taas oo u dhaxeysa **17-19 Sebtembar**.

Waxaad u baahan tahay inaad sameeyso si aad uga qeyb qaadato waa inaad bilowdo inaad carruurtaada ugu feedho garfeedha injirta xiliga fasaxa ah ee 17-19 Sebtembar. **Marka ay badato inteena qof ee ka qeyb qaadanaysaaba ayay ka sii weynaanaysaa fursada lagaga hor tagaayo dhibaata injirta ee xili dugsiiyeedka oo dhan.**

Marmarka qaarkood ayaa injir kugu jirtaa iyadoo aan la ogeyn maxaa yeelay ma laha mar kasta cuncun/is xogid marka aad qabto injirta. Marka la joogteysto feedhashada ayay taasi kaa caawineysaa in la ogaado oo la iska tirtiro injirta. Haddii la leeyahay injir ayaa la qaadsiiin karaa dadka kale. U sheeg dadka kale haddii aad qabto injir si ay dadka kugu waageysani iyaguna iskaga eegaan inay qabaan iyadoo dhamaan dadkoo dhamai ay helayaan fursad ay hal mar iskaga wada daaweynayaan. Shanlaynta injirtu aad ayey muhiim u tahay!

